



Macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo:
WWW.EDUCATION.OHIO.GOV/KRA

Cidda:

Qiimaynta u Diyaar Ahaanta Barbaarinta ee Dib loo Eegay ee Ohio waxa loogu talagalay dhammaan carruurta dhigata dugsiyada bulshada ama dadweynaha. Sidoo kale waxa laga heli karaa qaar kamid ah dugsiyada caqdiga een kuwa dadweynaha ahayn ee kaqaybqaadanaya.

Waxa:

Qiimayntu waxay cabbiraysaa aqoonta iyo awoodaha ilmahaaga ee afar aag: xirfadaha bulshada, luuqadda iyo qorista/akhriska, xisaabta, iyo fayoaqabka jireed iyo koboca dhaqdhaqaaqa.

Qiimayntu waxay ka duulaysa waayo-aragnimadii hore ee ilmahaaga waxayna bixinaysaa macluumaad loogu talagalay qoyskaaga, iyo sidoo kale macallinka ilmahaaga, taasi oo loo isticmaali doono in lagaga caawiyo ilmahaaga inuu wax barto oo uu koro.

Goorta:

Qiimayntu waxay bilaabmaysaa marka ilmahaagu galo barbaarinta. Macallimiinta barbaarinta Ohio waxay haystaan laba toddobaad kahor maalinta koowaad ee dugsiyada ilaa Noofambar 1 inay ku dhammaystiraan Qiimaynta U Diyaar Ahaanta Barbaarinta ee Dib loo Eegay.

Sababta:

Marka qiimayntu dhammaato, macallimiintu waxay hayn doonaan macluumaad ay la wadaagaan qoysaska. Macluumaadku wuxuu ka caawin qoysaska iyo macallimiinta inay wada shaqeeyaan si ay ardaydu guul uga gaaraan dugsiyada.

Sida:

Waxa jira saddex qaab oo ilmahaagu u muujin karo waxa uu yaqaano ee uu qaban karo. Saddexda qaab waa:

1. Doorashada jawaabta su'aal.
2. Qabashada hawl laga codsaday.
3. Iyadoo uu u kuur galayo macallinku inta waxbarashada iyo wakhtiga nasashada.



Macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo:
WWW.EDUCATION.OHIO.GOV/KRA

Cidda:

Qiimaynta u Diyaar Ahaanta Barbaarinta ee Dib loo Eegay ee Ohio waxa loogu talagalay dhammaan carruurta dhigata dugsiyada bulshada ama dadweynaha. Sidoo kale waxa laga heli karaa qaar kamid ah dugsiyada caqdiga een kuwa dadweynaha ahayn ee kaqaybqaadanaya.

Waxa:

Qiimayntu waxay cabbiraysaa aqoonta iyo awoodaha ilmahaaga ee afar aag: xirfadaha bulshada, luuqadda iyo qorista/akhriska, xisaabta, iyo fayoaqabka jireed iyo koboca dhaqdhaqaaqa.

Qiimayntu waxay ka duulaysa waayo-aragnimadii hore ee ilmahaaga waxayna bixinaysaa macluumaad loogu talagalay qoyskaaga, iyo sidoo kale macallinka ilmahaaga, taasi oo loo isticmaali doono in lagaga caawiyo ilmahaaga inuu wax barto oo uu koro.

Goorta:

Qiimayntu waxay bilaabmaysaa marka ilmahaagu galo barbaarinta. Macallimiinta barbaarinta Ohio waxay haystaan laba toddobaad kahor maalinta koowaad ee dugsiyada ilaa Noofambar 1 inay ku dhammaystiraan Qiimaynta U Diyaar Ahaanta Barbaarinta ee Dib loo Eegay.

Sababta:

Marka qiimayntu dhammaato, macallimiintu waxay hayn doonaan macluumaad ay la wadaagaan qoysaska. Macluumaadku wuxuu ka caawin qoysaska iyo macallimiinta inay wada shaqeeyaan si ay ardaydu guul uga gaaraan dugsiyada.

Sida:

Waxa jira saddex qaab oo ilmahaagu u muujin karo waxa uu yaqaano ee uu qaban karo. Saddexda qaab waa:

1. Doorashada jawaabta su'aal.
2. Qabashada hawl laga codsaday.
3. Iyadoo uu u kuur galayo macallinku inta waxbarashada iyo wakhtiga nasashada.

TALOoyINKA QOYSKA QAABABKA QOYSASKU U TAAGEERI KARAAN WAXBARASHADA CARRUURTOODA BARBAARINTA KUJIRTA**XIRFADAHA BULSHO**

- Kala hadal ilmahaaga sida uu dareemayo—aqoonso oo garo dareenadan. U sheeg ilmahaaga erayo ka caawinaya inuu muujiyo dareenkiisa, sida murugada, farxadda ama carada.
- Laabta u qabooji ilmahaaga markii caraysan yahay ama cabsanayo. Ka caawi ilmahaaga inuu garto marka dadka kale ay muujinayaan dareenadooda iyo sida loogu laab qaboojiyo.
- La samayso hawlo maalmeed ilmahaaga, sida wakhti ciyaareed, wakhti nadiifneed, wakhti seexasho iyo wakhti sheeko.
- Sii ilmahaaga tilmaamo "sahlan". Ku bilaw shay ilmahaagu ku samayn karo hal ama laba tallaabo oo tallaabooyinka kolba sii kordhi marka ilmahaagu barto raacista tilmaamaha.

FAYOQABKA JIREED IYO KOBACA DHAQDHAQAAQA

- Ku boori ilmahaaga inuu isagu dharka xirto. Ka caawi ilmahaaga inuu barto inuu suusadda xirto, furo ama xirto baldhamada koorka oo uu xirto xarkaha kabihiisa.
- Ka caawi ilmahaaga inuu barto hawlaha daryeelka shakhsiga, sida dhaqista gacmaha kahor cuntada iyo kadib suuliga.
- Sii ilmahaaga wakhti uu ciyaaro maalin kasta—ordo, lug ku boodo, boodboodo, baaskiil fuulo, kubbad ciyaaro.
- Kala hadal ilmahaaga badbaadada, sida ka gudbidda jidka.

LUUQADDA IYO QORISTA/AKHRISKA

- Wax ugu akhri ilmahaaga sida badan, luuqadda aad sida ugu fiican u taqaan.
- Laxamin la dheelka ilmahaaga— xiitaa laxanka erayada maalaayacniga ah dhayal ma aha!
- Ka caawi ilmahaaga inuu garto magaciisa qoran iyo in xarfuhu erayo sameeyaan oo erayaduna macne sameeyaan.
- La hadal oo la sheekayso ilmahaaga. Ka caawi ilmahaaga inuu barto sheegista fekerkiisa iyo ra'yigiisa isagoo aan mawduuca ka baxayn.

XISAABTA

- Ka caawi ilmahaaga inuu garto qaababka, sida goobooyinka, laba-jibbaarada iyo laydiyada. Ka raadi oo tilmaan qaaban ka muuqda deegaanka.
- Kala hadal ilmahaaga macnaha erayada lagu isticmaalo xisaabta, sida lambarrada, isku gee, ka jar, la mid ah ama isku mid ah, in badan ama yar.

**TALOoyINKA QOYSKA** QAABABKA QOYSASKU U TAAGEERI KARAAN WAXBARASHADA CARRUURTOODA BARBAARINTA KUJIRTA**XIRFADAHA BULSHO**

- Kala hadal ilmahaaga sida uu dareemayo—aqoonso oo garo dareenadan. U sheeg ilmahaaga erayo ka caawinaya inuu muujiyo dareenkiisa, sida murugada, farxadda ama carada.
- Laabta u qabooji ilmahaaga markii caraysan yahay ama cabsanayo. Ka caawi ilmahaaga inuu garto marka dadka kale ay muujinayaan dareenadooda iyo sida loogu laab qaboojiyo.
- La samayso hawlo maalmeed ilmahaaga, sida wakhti ciyaareed, wakhti nadiifneed, wakhti seexasho iyo wakhti sheeko.
- Sii ilmahaaga tilmaamo "sahlan". Ku bilaw shay ilmahaagu ku samayn karo hal ama laba tallaabo oo tallaabooyinka kolba sii kordhi marka ilmahaagu barto raacista tilmaamaha.

FAYOQABKA JIREED IYO KOBACA DHAQDHAQAAQA

- Ku boori ilmahaaga inuu isagu dharka xirto. Ka caawi ilmahaaga inuu barto inuu suusadda xirto, furo ama xirto baldhamada koorka oo uu xirto xarkaha kabihiisa.
- Ka caawi ilmahaaga inuu barto hawlaha daryeelka shakhsiga, sida dhaqista gacmaha kahor cuntada iyo kadib suuliga.
- Sii ilmahaaga wakhti uu ciyaaro maalin kasta—ordo, lug ku boodo, boodboodo, baaskiil fuulo, kubbad ciyaaro.
- Kala hadal ilmahaaga badbaadada, sida ka gudbidda jidka.

LUUQADDA IYO QORISTA/AKHRISKA

- Wax ugu akhri ilmahaaga sida badan, luuqadda aad sida ugu fiican u taqaan.
- Laxamin la dheelka ilmahaaga— xiitaa laxanka erayada maalaayacniga ah dhayal ma aha!
- Ka caawi ilmahaaga inuu garto magaciisa qoran iyo in xarfuhu erayo sameeyaan oo erayaduna macne sameeyaan.
- La hadal oo la sheekayso ilmahaaga. Ka caawi ilmahaaga inuu barto sheegista fekerkiisa iyo ra'yigiisa isagoo aan mawduuca ka baxayn.

XISAABTA

- Ka caawi ilmahaaga inuu garto qaababka, sida goobooyinka, laba-jibbaarada iyo laydiyada. Ka raadi oo tilmaan qaaban ka muuqda deegaanka.
- Kala hadal ilmahaaga macnaha erayada lagu isticmaalo xisaabta, sida lambarrada, isku gee, ka jar, la mid ah ama isku mid ah, in badan ama yar.

